

## **Barashada afka noorwiiijiga iyo culuunta bulshada oo bilaash ah**

### **Xaqqa barasho af noorwiiijiga iyo culuunta bulshada oo bilaash ah**

Ogolaanshaha deggenaanshahaaga Noorwey ayaa waxaa uu xaq ku siinayaa isugayn ah 600 oo saacadood oo ah barrida

- Af noorwiiijiga (550 saacadood), iyo
- Culuunta bulshada ( 50 saacadood ah)

Waxbariddu waa bilaash mudo sedex sano ah

- Laga bilaabo markii lagu siiyay ogolaansho deggeaan, ama
- Laga bilaabo markaad timid Noorwey adoo heysta ogolaansho deggeaansho

Haddii aadan billabin ama aadan dhamaynin waxbarashada saddexdaa sano guduhooda, waa in aad adiga iska bixisaa waxbarashada

### **Waajib ah barashada noorwiiijiga iyo culuunta bulshada**

Waa waajib ku saaran inaad dhameysato 600 saacadood oo ah barashada noorwiiijiga iyo culuunta bulshada, si lagu siiyo hadaad codsato

- ogolaansho deggeaansho, ama
- jinsiyad

Waajibaadkan kuma saara hadaad jirto 55 ama aad ka weyntahay xiliga aad codsiga soo gudbineyso.

Waxaad codsankartaa in lagaa qaado waajibaadka waxbarida hadaad

- caddeyn karto inaad u leedahay aqoon kugu filan luuqada noorwiiijiga ama tan saamiga ah, ama
- hadey jirto xaalad gaara oo caafimaad ama sababo kale oo adkeynaya waxbarashada.

### **Warbixin faa'iido leh**

Waa inaad adiga la xiriirtaa goobta waxbarashada dadka waaweyn ee gobolka aad ka diwaangashantahay, si aad u codsato waxbarashada, ama hadaad dooneyso inaad codsato in lagaa qaado waajibka waxbarashada. Haddaad qabtid su'aal ama aad u baahantahay warbixin ku saabsan waqtiyada kama dambeynta ah iyo xuquuqaha, la xiriir goobta waxbarashada dadka waaweyn

Waxaad sidoo kale warbixin ka heli kartaa shabakadaha [www.imdi.no](http://www.imdi.no) iyo [www.udi.no](http://www.udi.no)